

Hadal wadajir ah oo lagu cambaareynayo qaraxii ismiidaaminta ahaa ee maanta ka dhacay magaalada Muqdisho

Ciidanka Nabad Ilaalinta Midowga Africa ee Soomaaliya
Ururka Midowga Urub
Urur Goboleedka IGAD
Jaamacadda Carabta
Norway
Qaramada Midoobay
Dowladda Maraykanka

Nayroobi, 03 Diisembar 2009 – Ciidanka nabad ilaalinta Midowga Africa ee Soomaaliya, Ururka Midowga Urub, Urur Goboleedka IGAD, Jaamacadda Carabta, Norway, Qaramada Midoobay iyo Dowladda Maraykanka waxay si aad ah u cambaareynayaan falkii ismiidaaminta ee fuleynimada ahaa ee maanta loo geystay mas’uuliyiin ka tirsan Dowladda Federaalka Ku Meel Gaarka, ardey, wariyeyaal iyo dad kale oo rayid ah ee joogay magaalada Muqdisho.

Weerarkan bahalnimada ah wuxuu mar kale caddeynayaa in xagjireyaashu ayna sinaba ugu aabayeelin nolosha aadanaha. Maadaama ay isqarxintan lala beegsaday xaflad loo dhigay ardey ka qalinjebinaysay kulliyadda caafimaadka – kuwaasoo ah dhakhaatiirka Soomaaliyeed ee mustaqbalka – waa arrin aad u xun. Hase ahaatee, falalkan naflacaarnimad ah, kama reebayaan bulshada caalamka inay sii waddo taageerada ay siinayso dadka iyo Dowladda Federaalka Ku Meel Gaarka Soomaaliyeed, kuwaasoo ku hawlan inay waddanka dib ugu soo celiyaan nabad iyo xasillooni.

Weerarka waxaa ku dhintay saddex wasiir, waxaana si xun ugu dhaawacmay mid afaraad. Wasiirradan waxay si naftiihurenimo ah uga shaqaynayaan dibuheshiisiinta Soomaaliya. Wasiirradu waxay gudanayeen waajibaadkoodii qaran maadaama ay ka qaybgalayeen xaflad qalinjebin oo dhallinyaro Soomaaliyeed ay ugu dabbaaldegayeen guul u soo hoyatay noloshooda.

AMISOM, EU-da, IGAD, Jaamacadda Carabta, Norway, Qaramada Midoobay iyo Dowladda Maraykanku waxay tacsiiyo u dirayaan qoysaskii iyo asxaabtii dadkii ku waxyeelloobay weerarkan naxdinta leh, sidoo kale waxay tacsii u dirayaan xukuumadda iyo dadka Soomaaliyeed.

Wixii war dheeraad ah fadlan kala xiriir:

Susannah Price ama Donna Cusumano, saraakiisha qaabilsan isgaarsiintab guud, Xafiiska Qaramad Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya, Nairobi
Tel. +254 20 762 7132/7133 ama +254 733902020 ama 737400133

Fadlan eeg rugta Internet-ka (website)

www.unpos.unmission.org